Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay https://go.usa.gov/xtBQC.

Maarso 7, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS)
Ujeedada: Bisha Wacyi gelinta Naafanimada Korriinka

Way adag tahay in la rumeysto in aanu ka gudbayno bishan sanad guuradii labaad ee ka soo wareegtay markii ugu horrayn diiwaanka la galiyay kiiska COVID-19 ee Oregon. Tan iyo markaas, waxaan marnay caqabado badan oo ka jira bulshada naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD). Waxaanu luminay saaxiibo, xubno ka tirsan qoyska iyo shaqaalaha la wada shaqeeyo oo badan. Iyada oo la soo maray murugo iyo halgan, bulshada I/DD waxay muujisay adkeysi. Waxaanu u wada shaqeynay siyaabo aynaan weligeen is lahayn waa suurtagal, waanan ogahay in wax kasta oo imaan doona, aanu si wadajir ah uga gudbi doono.



Maarso sidoo kale waa bisha Bisha Wacyi gelinta Naafanimada Korriinka (DDAM). Hal hayska sanadkani waa Duni Dib looga fikiray “Worlds Imagined.” Ururka Golayaasha Qaranka ee Naafanimada Korriinka (NACDD) ayaa doortay hayskani si ay diiradda u saaraan sida adduunku isku beddelayo iyada oo aan ka gudbayno cudurka baahsan. Inaga oo shakhsi ahaan iskugu soo noqonayna ka dib laba sano go’doon lagu kala jiray, NACDD waxay inagu marti qaadaysaa in aan kor loo qaado wacyi gelinta ku saabsan ka mid noqoshada dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) ee bulshooyinkeena, in laga hadlo caqabadaha sii socda ee ay mararka qaarkood la kulmaan, iyo in aanu dabaaldegno sida ay u nool yihiin oo ay horumar u gaaraan iyaga oo ah xubin qiime leh oo ka tirsan bulshadeena.

Qayb ka mid ah tani ayaa ah dib uga fikirka waxa suurtagalka u ah bulshada I/DD iyo xaqiijinta in dunida cudurka baahsan ka dib ay tahay mid ay u siman yihiin dhammaan xubnaha bulshadeenu. Marka la joogo ODDS, waxaanu si joogto ah u qiimeyneynaa nidaamka I/DD ee Oregon oo ka shaqeynaynaa in aanu ka dhigno mid lagaga soo horjeedo cunsiriyada, diiradda lagu saarayo dhanka sinnaanshaha oo qofka ku saleysan. Bishani waxaan u dabaaldegaynaa dhammaan xubnaha ka tirsan bulshada I/DD. Waxaanu kugu dhiirigelinaynaa in aad hesho siyaabo kuu gaar ah oo aad uga qayb qaadato DDAM. Halkan waxaa ku qoran fikradaha qaarkood si wax loo bilaabo.

- Ma haysaa sheeko shakhsi ahaaneed, fiidiyow, sawir, xirmo ama ilo oo dadka la wadaagaya waayo-aragnimadaada wacyi gelinta I/DD ama caawin kara dadka kale? NACDD waxay aqbalaysaa soo gudbinta Ilaheeda Tilmaamaha DDAM rrolon-muniz@nacdd.org. Waxay rabaan in ay soo bandhigaan shaqada la qabtay si loogu dabaaldego oo loo wanaajiyo nolosha dadka qaba I/DD. Waxay si joogta u cusbooneysiin doonaan tilmaamaha bisha oo dhan.
- Soo deji Ilaha Tilmaamaha DDAM ee NACDD, astaamaha rasmiga ah ee DDAM oo fiiri ilo dheeraad ah. Bogga internet-ka NACDD ee ilaha DDAM oo ay ku jiraan tilmaamaha ilaha oo la soo dejisan karo oo ay ka buuxaan meelo laga sii gelayo ‘links’ maqaalo iyo fikrado lagu wadaagayo sheekooyin, sawirro, farxhaxan, warbaahinta dhanka maqalka ‘podcasts’ iyo waxyaabo badan. Tilmaantani waxaa sidoo kale lagu soo lifaaqay emailkani.
- Dadka warbaahintaada bulshada kula wadaag astaamaha ‘logos’, ilaha iyo sheekooyinka kor ku xusan. isticmaal #DDawareness2022, #DDAM2022 ama #WorldsImagined.
- Akhri oo dadka la wadaag ku dhawaaqida Guddoomiyaha Gobolka Oregon ee ku jirta website-ka Guddiga Naafanimada Korriinka ee Oregon (OCDD). Xaqiiji in aad waqti dambe oo bisha ka tirsan dib u soo laabato si aad u fiiriso u soo dejiso OCDD rasmiga ah iyo sawirka weyn ee sanadlaha ah ee DDAM.
- Fiiri Maamulka Nolosha Bulshada ee ilaha DDAM oo ay ku jiraan sawirrada warbaahinta bulshada si aad u soo dejiso oo aad dadka ula wadaagto.
- Qaado wakhti aad dib ugu xiranto asxaabta iyo qoyska qaybta ka ah bulshada I/DD. Farriin u dir ama wac. Waxay ahaayeen dhowr sano oo adag iyada oo uu qof kastaa isticmaali karo waxoogaa naxariis iyo taageero ah hadda.

Waxaan ku faraxsanahay in aan qayb ka noqdo bulshada I/DD ee la yaabka iyo adkeysiga leh ee Oregon. Waxaan rajeynayaa mustaqbalka iyo waxa ay bulshadeenu gaari doonto ee xigta.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.